

Waxka Badalka Tobobarka Iyada Oo Laga Jawaabayo COVID-19 Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Julaay 2021

Hoos, waxa aad ku yaala jawaabta ugu danbaysa ee Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) ee bixiyayaasha daryeelka ilmaha liisanka haysta ee buuxiyay tobobardii loo baahnaa mudada COVID-19, iyo macluumaadka ugu danbeeya ee mudada saacadaha adeega sanadkii.

OGOW: Laga bilaabo Janaayo 1, 2022, saacadaha tobobarka adeega waa in lagu dhamaystiraa hal sano (Janaayo 1 – Diseembar 31).

Shaqaalaha Hore (kahor COVID-19)

Shaqaalaha hore (la shaqaalaysiiyay wixii ka horeeyay Maarso 2020) waxa ay leeyihiin waxoo wax ka badal buuxinta tobobarka COVID-19 dartiis. Hoos waxaa ku yaala isbadalada bixiyayaasha hore u jira.

Tabobar	Waxka Badalka COVID-19
Tabobarka Shaqada	<ul style="list-style-type: none"> • MACLUUMAADKA UGU DANBEEYA: Bixiyayaasha waxay buuxin doonaan 10 saacadood oo tobobar shaqada ah sanadka. (Janaayo 1-Diseembar 31) • MACLUUMAADKA UGU DANBEEYA: Kala guurkan waxa uu bilaabmi doonaa iminka, kaas oo ku siinaya Julaay 1, 2020 ilaa Diseembar 31, 2021 inaad ku dhamaysato 10 saacadood oo tobobar shaqada ah.
CPR	<ul style="list-style-type: none"> • MACLUUMAADKA UGU DANBEEYA: Dhamaan shaqaalaha daryeelka ilmaha ama cida liisanka haysata ee ku cusboonaysiisatay kaadhkooda CPR si onleyn ah inta u dhaxaysa Maarso 2020 ilaa iminka, waxa ay sugayaan taariikhda xigta ee ay cusboonaysiisan karaan CPR-kooda si ay u galaan tobobarka foolka-foolka ah mar kale. • MACLUUMAADKA UGU DANBEEYA: Dhamaan shaqaalaha daryeelka ilmaha ama cida liisanka haysata ee ku qaadatay kaadhkeeda CPR ee <u>ugu horeeya</u> onleyn inta u dhaxaysa Maarso 2020 ilaa iminka waa inay dhamaystiraan qaybta kaqaybgalka toosk ah ee tobobarka CPR ee bixiyaha la ansixiyay maadaama oo laga heli karo bulshadaada. Dhamaan dib u cusboonaysiinta waa in lagu sameeyaa qaybta kaqaybgalka tooska ah.
Kaalmada Kowaad	<ul style="list-style-type: none"> • Ka dhamaystiro tobobarka Kaalmada Kowaad oo onleyn ah bixiye la ansixiyay. • Marka tobobarka foolka-foolka ah mar kale la heli karo, waa in la galaa tobobarka foolka-foolka ah.
Caabuqa Dhiiga	<ul style="list-style-type: none"> • Waxaa lagu heli karaa onleyn. • Tobobarka onleynka ahi waa inuu buuxiyaa shuruudaha tobobarka Waaxda Washington ee Shaqada iyo Shaqaalaha (Washington State Department of Labor & Industrie), (L&I) (tinyurl.com/Laborandindustries).
Hurdada Amaanka ah	<ul style="list-style-type: none"> • Buuxinta tobobarkan waxba iskama baddalayaan: u ah onleyn goobta Tobobarka Onleynka ah ee DCYF (DCYFTraining.com). • Waa in sanad kasta ay galaan dadka ka shaqaynaya barnaamijyada liisanka haysta ee daryeelka caruurta sabiga.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

	<ul style="list-style-type: none"> • Aan buuxin shuruudaha tobobarka dib u cusboonaysiinta ee bixiyayaasha aan daryeelin caruurta sabiga ah.
Tobobarka Caafimaadka iyo Amaanka Sanadkii	<ul style="list-style-type: none"> • Bixiye kastaa waa inuu ku dhamaystiraa hal saacad gudaheed tobobarka amaanka iyo caafimaadka sanad kasta sida ay dhigayaan shuruudaha federalku (shuruudaha CCDF). • Waxaa jira sadex dariiqo oo loo dhamaystiran karo: <ol style="list-style-type: none"> 1. Wixii dib u cusboonaysiinta ku qoran kor. 2. Ka dooro 'Tobobarka Caafimaadka iyo Amaanka ' ee daaqada tobobarka DCYF (DCYFTraining.com). 3. Dooro tobobarkaaga wax ku oolnimada ee aaga V 'Caafimaadka, Amaanka, iyo Nafaqada.'

Shaqaalaha Cusub (inta lagu jiro COVID-19)

Shaqaalaha iminka la shaqaalaysiiyay (ilaa Maarso 2020) waxay qaadan karaan ikhtiyaar gaaban ama wax laga bedeley oo shuruudaha tobobarka hore ah si loo dedejiyo awoodooda ay caruurta ku keliyaysan karaan.

Tabobar	Waxka Badalka COVID-19
Aasaasiyaadka Daryeelka Carruurta (Child Care Basics)	<ul style="list-style-type: none"> • Nuqulka kumeel gaadhka ah, ee cufan ee Aasaasiyaadka Daryeelka Ilmaha ayaa la heli karaa. <ul style="list-style-type: none"> ○ Waxay qaadataa celcelis ahaan ilaa sadex saacadood dhamaystirkeedu. ○ Waxa lagu heli karaa Ingiriisi, Isbaanish iyo Soomaali. ○ Waxaa lagaga heli karaa onleyn ahaan goobta Tobobarka Onleynka ah ee DCYF (DCYFTraining.com) halka ka hoosaysa 'COVID-19 Temporary Health and Safety Training.' ○ MACLUUMAADKA UGU DANBEEYA: Waa inaad dhamaysataa nuqulka Aasaasiyaadka Daryeelka Ilmaha (Child Care Basics) oo buuxa inta lagu jiro sanadka 2022 (Janaayo 1 ilaa Diseembar 31, 2022). • Waxa aad dhamaystirataa iminka tobobarka Daryeelka Carruurta Aas Aasiga ah (Child Care Basics). <ul style="list-style-type: none"> ○ Ikhtiyaarada hore oo dhan waxay ku qoran yihiin halkan (tinyurl.com/CCOptions) oo wali la heli karo.
CPR	<ul style="list-style-type: none"> • MACLUUMAADKA UGU DANBEEYA: Laga bilaabo Sebtembar 1, 2021, DCYF waxa ay dib ugu laabanaysaa siyaasada caadiga ah ee uga baahan dhamaan shaqaalaha daryeelka ilmaha ee cusub inay buuxiyaan tobobarka kaqaybgalka tooska ah ee CPR (foolka-fool) oo uu bixinayo bixiye la ansixiyay.
Kaalmada Kowaad	<ul style="list-style-type: none"> • Ka dhamaystiro tobobarka Kaalmada Kowaad oo onleyn ah bixiye la ansixiyay. • Marka tobobarka foolka-foolka ah mar kale la heli karo, waa in la galaa tobobarka foolka-foolka ah. • Waxa aad ku dhamaystirtaa qaybta kaqaybgalka tooska ah qaabka foolka-foolka ah (sida ay u munaasab tahay) marka ay munaasab tahay sida sharciga deegaankaagu sheegayo/wajiga dib-u-furidda.
Caabuqa Dhiiga	<ul style="list-style-type: none"> • Waxaa lagu heli karaa onleyn. • Tobobarka onleynka ah waa inuu buuxiyaa shuruudaha tobobarka L&I (tinyurl.com/Laborandindustries).

Kaadhka Shaqaalaha Cuntada	<ul style="list-style-type: none"> • Waxaa lagu heli karaa onleyn. • Tobobarka onleynka ah waa inuu buuxiyaa shuruudaha Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington (Washington State Department of Health, DOH) (tinyurl.com/FoodWorkerCard).
Hurdada Amaanka ah	<ul style="list-style-type: none"> • Buuxinta tobobarkan waxba iskama baddalayaan: u ah onleyn goobta Tobobarka Onleynka ah ee DCYF (DCYFTraining.com). • Waa in sanad kasta ay galaan dadka ka shaqaynaya barnaamijyada liisanka haysta ee daryeelka caruurta sabiga.

Shaqaalaha Adeegyada Gaarka ah iyo Taageerada

Kaalinta	Shuruudaha
Adeegyada Gaarka ah <ul style="list-style-type: none"> • Dhakhtarka Hadalka • Shaqaalaha Waxbarashada Dugsiga Kahor ee Korniiinka • Taageerada IEP ee Kale 	Marka la siinayo adeegyada tooska ah ee ilmaha kuwaas oo hoos yimaada IEP ama Qorshaha Daryeelka Shakhsi Ahaaneed oo ay jirto ogolaanshe waalid oo saxeexan wixii booqashooyinka ah oo ku jira faylka ilmaha, ma jiraan shuruudo tobobarka caafimaadka iyo amaanka ah oo ay tahay in la buuxiyo.
Taageerada Waxbarashada Onleynka ah ee Shaqaalaha (Ma aha Saami ama Kormeer La'aan)	Hadii uu jiro qof xaruntaada u imanaya taageerada waxbarashada onleynka ah oo aan lagu tirin saamiga ilmaha iyo shaqaalaha oo aan caruurta kaligii lagaga tegin, waxaa loo arkaa inuu yahay qof mararka qaar wakhtiga ugu deeqa oo uma baahna tobobar.
Shaqaalaha Kumeel Gaadhka Saamiga Ayey Ku Jiraan	Dhamaan shaqaalaha (xataa hadii ay ku meel gaadh yihiin) ee loo tiriyo saamiga waxa waajib ah inay buuxiyaan shuruudaha tobobarka sida uu dhigayo liisanka WAC ee kaalintooda iyo heerka ay caruurta ku hayn karaan.